SANDEFJORD KOMMUNE

# I BARNEHAGEN SAMMEN

## Informasjon til foreldre med barn i barnehage i Sandefjord



**SOMALI**

Denne brosjyren er utarbeidet i Sandefjord kommune gjennom prosjektet «I BARNEHAGEN SAMMEN». Prosjektet er finansiert av Utdanningsdirektoratet og har som mål å øke andelen minoritetsspråklige barn som går i barnehage.

Takk til prosjektgruppa for gode diskusjoner om hvilke temaer som burde være med.

Tusen takk til styrerne i Elverhøy barnehage, Barnas Have (sentrum), Prestekragen / Krokusen barnehage og Bugården / Kapteinløkka barnehage for grundig gjennomlesning og gode innspill.

Sandefjord, august 2020

Tove C. Kittelsen (prosjektleder)

# WADAJIR XANAANDA

## Macluumaadka loogu talagalay waalidiinta leh carruurta dhigta xanaanada ku taal Sandefjord

Tani waa macluumaad loogu talagalay adiga carruurta ku leh xanaanda carruurta degmada ama pirvatka gaar ah. Halkan waxaa lagu sharaxayaa qaab dhismeedka xanaanada, qiimayaasha, abaabulka iyo waxa ku jira. Sido kale wax yar ayaan ka qori doona wax qabadyada malmaha iyo jadwalka sanadkaan ee xanaanada. Waxaan sidoo kale rabnaa inaan gaarsiinno doorka bulshada ee xanaanada muhiim uu tahay, Hadi noqoto sida u diyaarinta iskuulka iyo isku dhex geelinta wanaagsan oo bulshada. Sido kale waxaan xoojinaynaa muhiimadda xiriirka ka dhexeeya xannaanada iyo guriga.

Qiyaastii boqolkiiba 92 caruurta Noorway joogta ayaa taga xanaanada. Wadamada kale qaarkood caadi maaha in loo tago xanaanada caruurta cadi ahaanba. Xanaanada caruurta ee wadamaha kala gedisan ayaa waliba ku kala duwanaan kara dhowr meelood. Waxa loo arko daryeel wanaagsan iyo barbaarin sidoo kale waxay kuu xirnaan karta dhaqan. Sido kale bulshada sidee uu arkaan waalidiinta iyo carruurtu way ku kala duwan yihiin waddamoyinka aduunka.

Macluumadkan waxaa si gaar ah loogu talagalay waalidiinta ku hadla luqadaha wadanka kuu yar wuxuuna sharraxayaa calamadaha guud oo ah xanaanadaha ee Noorway qaas ahaan iyo xanaanooyinka Sandefjord. Waxaan rajeyneynaa inay tani saxdo filasho oo walidka iyo adgeeyso wada shaqaynta uu dhexeeya waalidiinta iyo xanaanada.

### 1. SHARCIGA XANAANDA IYO QIIMAYASHA

Sharciga xanaanooyinka carauurta (fiiri «link» 1 dhamaadka dukumintiga) waxaa soo gudbiyey baarlamanka isla markaana nidaamiyo waxyaabaha iyo howl qabashada ka jira dhammaan xanaanada caruurta ee Norwey. Xannaanooyinka degmada iyo kuwa pirvatka - labaduba waxay leeyihiin sharci isku mid ah. Qaybta 1-aad ee Sharciga Xannaanadu waxay bixisaa sharraxaad wanaagsan oo ku saabsan shaqada ugu weyn ee xannaanada:

*«xanaanada caruurtu iyadoo wada shaqayn iyo isfahan la leh guriga waa inay dabooshaa baahida ilmaha ee xanaanayn iyo ciyaareedba, iyo horumarinta aqoon iyo tarbiyadeed oo aasaas u ah koritaan dhamaystiran».*

Qorshaha dalka ee qaab dhismeedka xanaanada caruurta («link» 2) wuxuu si gaar ah u micneeyna waxa ku saabsan xanaanada iyo shaqooyinka. Waxa kuu qoraan in shaqada xanaanada ay kuxirantahay qiimahan: dimuqraadiyada, kala duwanaanshaha iyo is ixtiraamka, is la simnan iyo is la qimo, horumarka joogtada ah iyo xirfadaha nolosha iyo caafimaadka.

Qorshaha guud wuxuu kaloo sharraxayaa mawduucyada ay tahay in lagu daroyo fursadaha iyo jadwalka xanaanda:

- Xidhiidh, luuqad iyo qoraal
- Jidhka, dhaqdhaqaaqa, cunto iyo caafimaad
- Farshaxan, dhaqan iyo hal abuur
- Bay’ada, deegaanka iyo farsamada
- Tirada, qol/mug iyo qaab
- Anshax, diin iyo falsafada
- Deegaanka dhow iyo bulshada

Xannaanadu sidoo kale waxay leeyihiin qoraalo u gaar ah, oo soo micneeyso sharciyasha isku qorka xanaanda, lacag bixinta iyo fursadaha waalidiinta ee wada go`aanka. Qoraalkas waa heshiiska u dhexeeya xannaanada iyo waalidka waana muhiim in la akhriyo oo la fahmo kuwan.

Xannaanadu waliba waxay sanad kaasta sameeyaan jadwal e sanadeed oo gooni ah, kaasoo ah dukumintiga ugu muhiimsan dhinaca waxbarashadda. Qorsaaha sanadeedku waa shaqocawis oo loogu talagalay xannaanooyinka waxayna waalidiinta siisaa warbixin ku saabsan waxa ka dhici xanaanda carruurta sannadka oo dhan. Waxaynu kale xanaanadu lahaan karaan qorsheyaal iyo mashruucyo xilliyeed.

## 2. MASUULKA XANAANDA BULSHADA KAA LEDAHAY

Maaha khasab in la aado xanaanada, laakiin waxaan wali u aragnaa inay tahay tillaabada koowaad ee nidaamka waxbarashada. Qiyaastii boqolkiiba 92 caruurta ku nool Norwey waxay aadayaan xanaanada muddo gaaban ama dheer. Qaybta carruurta luqadaha kale wadanku kuu yar aadan xanadna way kaa yaar yihin kuwa kale, qiyaastii boqolkiiba 82, laakiin tani waa sii kordheysaa sannadkaasto. Cilmi baaris ayaa muujisay in carruurta luqadaha wadanku kuu ee dhigta xanaanada ay ku fiicnaadaan nidaamka iskuulka marka loo eego kuwa aan qibrad ka heyn xanaanada.

Waxay si gaar ah muhiim ugu tahay caruurta leh luqadooda hooyo aan aheyn noorwiiji ineey aadaan xanaanada dhowr sano. Qaabkaas, ilmuhu wuxuu ku baran karaa luqada noorwiijiga wanaagsan kahor intuusan dugsigu bilaaban, laakiin wuxuu kaloo ku baran karaa afka hooyo guriga dhexdiisa. Caruurtu waxay baran karaan dhowr luqadood isku mar. Waxay caadi taas ka tahay ugu badnan wadamaha adduunka. Waa muhiim in waalidku kula hadlaan ilmaha afkooda hooyo, laakiin guriga iyo xanaanada labadaba waa inay taageeraan horumarka ilmaha sii luqadaha kaale ay uu bartaan. Xannaanadu waxay ka leeyihiin karti wanaagsan xagga waxbarashada luqadda. Waa inay ku taageeraan carruurta inaay ku hadlaan afkooda hooyoda, laakiin isla mar ahaantaana ay si firfircoon ka shaqeeyaan carruurta afkooda noorwiijiga

Xannaanadu waxay aasaas wanaagsan u saameyan mustaqbal iskuul dhigashada ee dhammaan carruurta. Bulshada Noorwiijiga dhexdeeda, aad bay muhiim utahay in la helo waxbarasho, badana shaqooyinka waxay ubaahanyihiin in kabadan 10 sano oo dugsiga hoose iyo dheexad ah. Waa gool in qof walbaa helo fursad uu ku dhammaystiro ugu yaraan dugsiga sare.

Xannaanadu waa meel carrurta kalsooni ah ku ciyaaraan, kaa heelan horumar iyo waxbarasho. Khibradaha la is wadaago, caqabadaha iyo waaya-aragnimada ayay carruurtu meesha

xanaanda kaa abuurta saaxiibtinimo iyo bulshaad inta badan muhiim u ah mustaqbalka. Waalidiin badana xanaanda ayaa sidoo kale waxay ka helaan faa`ido dhinaca bulshada.

Xannaanadu waa bulsho yar oo caruurta, waalidiinta iyo shaqaalooyinka kala duwan kuu kulmaan, halkaas oo kala duwanaanta loo arko inay tahay wax wanag leh. Xannaanooyinka pirvatka loo leeyahay iyo kuwa degmada Sandefjord waxay qorteen “Qoral ixtiraamayso wada simnanta iyo wada hor uu maarinta xanaanda” (link 3). Tani waxay sharraxaysaa sida dhammaan carruurta iyo qoysaska loogu dari karo oo u qaybgalaan bulshada xanaanda, iyadoo lagu saleynayo awoodooda iyo aqoontooda  sido laa taxaadarayo inaay kaa qaybqadan qo`amaaha.

Sidii jaa laa soo sheegay, dhammaan xanaandha Noorway waxay leeyihiin qimooyin isku mid ah waxana laga sharxay Qorshaha Guud. Waxaa kaa miid ah xanaandaha  inaay caawin siyaan carruurta sii ay ku guuleystaan gimayaasha dimoqraadiyadda iyo sharciyaha maanta asaalka uu ah bulshada. Waxaa kaalo xanaanadu laga raba inay horumariyaan kala duwanaanta iyo is ixtiraamka iyagoo muujinaya inay jiraan habab badan oo dhinica fikiridaha iyo nolosha. Xannaanadu waa inay sidoo kale horumariyaan is la simnanta iyo is la qimaha iyadoon loo eegin waxyaabo kale, kaa mid ah  jinsi, cafimadka, jiheynta galmada, asaalka, heerka bulshada, luqadda iyo diinta. Waxay kaalo leeyihiin shaqo muhiim ah marka laa firiyo horumarka mustaqbalka: xanaanadu waxay gacan ka geysan doontaa carruurta barashada si ay u daryeelaan Bay’ada  maanta iyo jiilalka mustaqbalka faa bay’ada ido kaa heelan. Xirfadaha nolosha iyo caafimaadka sidoo kale waa inaay kaa mid ahaato qimaayasha xanaanada. Tan micnaheedu waxaa weeye inaay carruurtu la kulmaan nolol wanaagsan, farxad leh, heer sare, iyo isku-kalsooni. Xannaanadu waa inay ahaataa meel aamin ah waana inay ku dhiirrigelisaa bulshada iyo saaxiibtinimada ayna ka hortagto xoogsheegashada.

## 3. BILOWGA XANAANADA IYO LA QABSASHADA

Xannaanada Sandefjord waxay si weyn xoogga u saartaa carruurta inay si wanaagsan inaay uu bilaabaan xanaanada iyo xiriir wanag leh oo ay la yeeshaan carruurta kale iyo dadka waaweyn. Macluumad ayaa laga sameeyay bilowga iyo la qabsashada, oo lagu tarjumay dhowr luqadood (link 4). Halkan waxaa ku qoran:

«Dhammaan carruurta iyo waalidiinta waa inay helaan macluumaad wanaagsan oo ku saabsan xanaanada iyo qoysku waxay yeelan doonaan qof lala xiriirayo oo la socda cunugga shaqsiga ahan. Ilmo kasta waa in la arkaa oo la maqlaa oo lagu daadalo inaay caiwmadka xanaanada a ee ku habboon baahidooda laa siyo ».

Xannaanooyin badan ayaa martiqaada inaad soo booqato ka hor intaadan bilaabin sii aad u barato oo aad hesho macluumaad wanaagsan. Markuu ilmahaagu bilaabo xanaanada, waxaa lagugu casuumi doonaa wareysi bilow ah. Xannaanada carruurtu waxay rabaan inay ogaato asalka ilmaha, horumarka iyo u baahan tahay in lagu daryeelo ilmaha sida ugu wanaagsan ee ugu habboon ee loogu talagalay xannaanada.

Marka ugu horreysa xannaanada, waalidku waa inay la joogaan ilmaha. Intaay u bahanyihin inaad laa joogta way kala duwantahay intaa ay la qabsadaan qaarkood waxay qaataan seddex

maalmood, qaarna waxay qaataan seddex toddobaad. Waxaad laa joogi kartaa inta aad u baahan tahay si aad u dareento amaan.

## 4. MAALIN JOOGTA XANAANADA

Marka la bilaabayo xanaanada waxaad ka heli doontaa macluumaad ku saabsan xannaanada shaqaadoda iyo waxyaabaha joogtada ah. Xannaanooyinka badankood waxay furan yihiin Isniinta ilaa Jimcaha laga bilaabo 07:00 illaa 16:30, laakiin ka hubi tan xannaanada ee ilmuhu ku joogan. Waalidku waa kuwa iyagu doorta goorta ilmaha la geyn doono xanaanada aroortii iyo goorta la soo waadi doono, laakiin way ku wanaagsan tahay ilmuhu inaay kaa qaybqatan waxyaabaha joogtada ah oo kaa mid ahaadan furasadaha ilmaahu kaale saameyan. Xannaanooyinka badankood waxay rabaan in carruurtu laa keeno ugu dambeyn 09.30. Shaqaalaha xannaanada waa in lala xiriiraa markii ilmaha la keeno iyo la qaadayo. Haddii ilmuhu maalin ay joogan guriga, waa in la ogeysiiyaa xanaanada iyo haddii u qof kale soo qaadi doono cunugga aan ahayn kuwa sida caadiga ah.

Caruurta jiran ma aha inay imataan xanaanada. Haddii ay jirto matag ama shuban, cunugu waa inuu guriga joogaa ugu yaraan 48 saacadood kadib markii u raysto. Caruurtu waa inaysan imaanin xannaanada oo iyaago leh qandho ama haddii ay u baahan yihiin paracetamol. Sidoo kale waa muhiim in carruurta leh qufac daran ama astaamaha neefsashada lagu hayo guriga. Waxaa jira tilmaamo qaran oo loogu talagalay goorta carruurtu inaay guriga joogaan (link 5). Xor baad u tahay inaad weydiiso xanaanada warbixin dheeraad. Haddii ilmuhu xannuunsado inta lagu jiro xanaanada, waa lagaalua soo xiriirayaa waana inaad isla markiiba cunugga soo qaadataa.

Waa caadi in laga bixiyo cuntada xanaanada (Lacagta rashiinka). Qiimaha ayaa ku kala duwanaan doona xanaanada, iyadoo kuxiran cuntada la siinayo. Xannaanooyinka badankood, carruurtu sidoo kale waxay guriga ka soo qaatan cunto. Xannaanadu waxay misaanka saaraan cunnooyin caafimaad leh, oo ay ku jiraan khudrad fara badan, cagarka iyo cuunto sonkor aad u yar. Waxay kaa taxaadaran xasaasiyadda ilmaha ama baahida cunno ee shaqsiyeed, waana muhiim inaad tan soo sheegtid bilowga.

Maalintii oo dhan, waxaa ka jira xanaanada fursaado badan, kuwa yar iyo weynba, banaanka iyo gudaha. Waa wax caadi ah inaay carruurtu banaanka kuu ciyaran, sanadka oo dhan. Hawlaha fursadaha hawada iyo bannaanka ayaa loo arkaa inay qiimo weyn leedaahay, iyadoon micno laahayn cimilada iyo jaawiga, carruurtu inaay wasakh noqtan waa qeyb ka mid ah ciyaarta bannaanka. Tani waa mid gaar u ah xanaanooyinka noorwiijiga, waxaana muhim ah carruurtu inay lahaadaan dhar ku habboon taas (link6). Xannaanadu waxay bixin donaan warbixin bilow ah oo ku saabsan ilmuhu dharka iyo qalabka u baahan yiihin. Waa caadi carruurtu inay dhaxlaan dharka walaalaha iyo asxaabta iyo laa iibsadoo second hand.

Gudaha, waxyaabo badan oo xiiso leh ayaa kaa dhacoo, oo ay ku jiraan sawirro iyo fursado aaqli leh, kor u akhrin, muusig iyo ciyaaro kala duwan. Waxa kale waqti badan laa siyaa ciyarta. Ciyaarta ayaa dadka waaweyn ama carruurtu way maamuli karaan ciyaarahooda, iyadoo l dadka waaweyn markii loo baahdo sacaadi kaaran. Xuquuqda carruurta ee ciyaarta ayaa lagu sharxay Heshiiska Qaramada kuu sabsaane xuquuqda caruurta (link 7). Wax ku barashada ciyaarta muhiim u tahaay xanaanada caruurta Noorway. Ciyaar ahaan, dibedda iyo

gudaheedaba, carruurtu waxay ka caawisa xirfadahooda luqadeed. Intaa waxaa sii dheer, toyku wuxuu bixiyaa aqoon ku saabsan, waxyaabo kale, dabeecadda iyo bay'ada, tikniyoolajiyada, tirada, mugga iyo qaabka. Caruurtu sidoo kale waxay horumariyaan kartida bulshada ee xanaanada. Taasi waa, waxay bartaan, tusaale ahaan, inay daryeelaan dadka kale, wadaagaan, dhageystaan kuwa kale iyo inay bulshada kaa helaan boskooda..

Caruurta ku seexan doonta xanaanada inta lagu jiro maalinta badanaa waxay seexdaan vognaaha. Waxaan aaminsanahay inay carruurtu ka faa'iideystaan hawo nadiif ah oo ay si fiican u seexdaan banaanka. Xannaanaduhu waxay leeyihiin meelo loogu talagay, taas oo eh meel qalaaysan. Waxaa jira habab wanaagsan oo loogu talagalay daryeelka carruurta inta ay hurdaan. Caruurtu waa inay haystaan vognaaha, buusto, iyo qalabaha kale oo lagu seexdo bannaanka. Waalidku waa inay iyagu si joogto ah u maydhaan tan. Haddii cunugu u baahan yahay inuu seexdo gudaha, tani waa in xanaanad lagaa balaamo.

## 5. XANAANADA SANAD KUU WAREEGA

Hawlaha xannaanada waxaa inta badan saameyn ku ledahaay xilliyada iyo kalandarka. Xilliga qaboobaha waxay noqon kartaa ciyaar dibedda ah barafka ama balliyada, guga waxaan raaci araag saari kaarna ubaxa koraya iyo waxa laga yaabee inaa dabaalano. Intaa waxaa sii dheer, xanaanada mararka qaarkood waxay booqdaan parkii, beer, matxaf iyo meelo kale. Dhamaan howlahaas, xanaanada ayaa waliba siyaabo kala duwan ula shaqeysa mowduucyada lagu qeexay waxbarashada xanaanada.

Xannaanadu waxay u diyaar garowdaa inaay calaamadiyaan ciidaha kala duwan iyo dabaaldegyo caan ka ah Noorway, sida Ciidaha, 17ka Meey iyo Kirismaska. Sido kale waa caadi in la xuso Maalinta Qaranka ee Sami maalinta 6da febraayo iyo lucia 13ka Disembar, waxaa kalo dhowr fasaxyo caalami ah iyo dabaaldegyo ayaa la calaamadeeyay, sida carnival, maalinta UN iyo Maalinta lugadda hooyada.

Waxbarashada xanaada wuxuu sheegayaa: "Shaqaaluhu waa inay carruurta siiyaan aqoon oo uu dabaaldegaan ciidaga, ciidaha iyo dhaqanka masiixiga iyo aragtiyaha ee kaa matalasan xanaanada ". Xannaanooyin badan, tusaale ahaan, diwaliyaan  ee reer hindi, hurdish newroz iyo xafladda Islaamka Id Al Fitr. Tan macnaheedu maahan in xanaanadu ay tahay inay qabtaan waxbarasho diineed, laakiin in Kiristanka iyo ciidaha kaleba lagu dabaaldaago. Ilmuhu waa inay helaan xaqiijinta aqoonsigooda oo ay dareemaan inay kaa mid yihin bulshada. Isla mar ahaantaana, xanaanadu waa inay ku dadaasho carruurta horumarin dulqaad iyo ixtiraamka dadka kale siyaan.

Xannaanadu sidoo kale waxay uu dabaaldegan dhalashada carruurta, waa loo hees, koofiyad laa siya iyo buufinn laa boofiya. Xor baad u tahay inaad tan kala hadashid xanaanada.

## 6. SHAQAALOYINKA XANAANADA

Dhamaan xanaanada waxay leeyihiin gudi (hogaamiye), macalimiin xanaanada, shaqaale xirfadleh iyo kaaliyeyaal. Xannaanaduhu waxay u qaybsan yihii qayb qayb, qaar waxay leeyihiin caruur yar yar (0-3 sano) qaarna caruur waaweyn (3-5 sano). Waxaa lagu go'aamiyay sharci kuu

sabsan sida shaqaalaha xannaanada carruurtu ugu yaraan ahaadaan (inta qof). Qaybaha socod baradka waa inay lahaadaan ugu yaraan hal hogaamiye tacliin 7dii canugba, sido kale waa in ugu yaraan 1 shaqaale saddexdii carruur noqdaan. Qaybaha carruurta waaweyn, waa inay lahaadaan ugu yaraan hal hoggaamiye tacliin 14 carruur ah iyo ugu yaraan 1 shaqaale 6dii carruur ah.

Xannaanadu waxay leeyihiin shaqaale aqoon leh oo tababaran, oo aqoon fiican u leh baahiyaha carruurta iyo horumarka, jir ahaan iyo maskax ahaanba, xagga luqadda iyo xagga bulshada. Way fiican tahay in loo adeegsado shaqaalaha xannaanada carruurta sidii ilo macluumaad iyo horjoogeyaal sannadihii hore ee carruurta, markii loo baahdo.

Dhamaan shaqaalaha xannaanada waxaa ku waajib ah xilqarin. Taas macnaheedu waa in macluumaadka ku saabsan waalidiinta iyo carruurta aan loo sheegin dad kale. Shaqaaluhu waa inay sidoo kale soo bandhigaan shahaado boolis oo la ogolaaday ka hor intaysan bilaaban.

## 7. WADA SHAQAYN WAALIDKA IYO XANAANADA

Xiriirka lala leeyahay hooyada, aabaha ama ilaaliyaha kale waa xiriirka ugu muhiimsan cunugga marka ilmuhu tago xannaanada. Xannaanadu waa inay yeelato wadashaqayn dhow oo ka dhexeysa guriga, oo ku dhisan furfurnaan iyo is aaminaad. Xannaanooyinka Noorwejiyanka way ka duwan yihiin xanaanooyinka dalal kale oo badan marka laga hadlayo wada shaqaynta dhow ee waalidka. Shaqaalaha iyo waalidiinta waxaa waajib ku ah inay wax kasta isweydiiyaan, xiriir maalinle ah ama wadahadal iyo kulaamo. Xanaanada caruurta badankood waxay adeegsadaan xariirka dijitaalka ah (e-mail, "SPOR", appka). Intabadan xariirka waxay ku dhacdaa luqada noorwiijiga waana muhiim inaa waydiiso waxa aadan fahmin.

Waalidiinta waxaa lagu casuuma ugu yaraan labo kulan waalid sanadki, halkaas oo aad kula kulmaaysi hogaamiyaha waxbarashada oo aad kahadleeysan cunuga iyo arrinta ku saabsan xanaanada. Xirfadlayaasha kale waa lagu casuumi karaa hadaad ogolaato. Waa muhiim inaad codsato turjubaan haddii uu bahaantahay. Xannaanada ayaa waliba tixgelin karta haddii loo baahan yahay turjubaan si ay u diibto macluumaad wanaagsan.

Xanaanada sidoo kale waxay casuumad dhiibtaa hal ama in kabadan kulumo waalidka sanadka gudihiisa. Waxaa la filayaa inaad timaaddo oo  waa mid xiiso iyo wanag badan leh. Aad bay u hagaagsan tahay in la weydiiyo su'aalaha ku saabsan arrimaha aad ka walwalsan tahay. Kulamada waxaad sidoo kale ku baran kartaa waalidiinta kale. Xannaanada sido kale badaan ayaa casuumaan marka ay tahaay tusaale ahaan, quraacda «påske», xafladaha sommerka iyo kuwa kale.

Waalidka dhamaan caruurta dhigata xanaanada waxaa laa magacaba guddiga waldinta. Guddiga waalidiinta ayaa kuu daadalan wada shaqayn shaqalaha, sidoo kale waxay doortan wakiillo matalaya FAU (guddiga shaqada waalidiinta) iyo SU (guddiga wada shaqaynta). Xaqiiqada ah in waalidku fursad u leeyihiin inay si weyn uga qeyb qaataan xanaanada caruurta ee Noorway way ka duwan yihiin wadamo kale.

FAU waxa ka kooban waaliddiinta qaybaha, waxayna tusaale ahaan diyaarin kartan isu imaatin bulsheed oo loogu talagalay carruurta, qoysaska iyo shaqaalaha, marka lagu daro

wadashaqeynta kale ee lala yeesho xannaanada. SU wuxuu ka kooban yahay wakiillo ka socda waalidiinta iyo shaqaalaha. Kooxdani waxay waxay masuul kaa yihin arrimaha ku saabsan waxyaabaha ku saabsan xanaanada carruurta, wadashaqeynta waalidka iyo qorshaha sannadeedka.

## 8. LA WADA SHAQAYNTA XAFISAHA KALE

Xannaanadu waxay la shaqeeyaan dhowr hay'adood oo xirfadlayaal ah, sida PPT (adeegga cilmi-nafsi cawimadka), xarunta qoyska iyo xeer-ilaalinta carruurta, si loo hubiyo in carruurta oo dhami ay helaan waxtarka ugu wanaagsan ee suurtogalka ah ee xanaanada iyadoo lagu saleynayo baahidooda. Markay carruurtu go'aanno ka gaaraan adeegyada ka socda wakaaladan, wadashaqeyntu waa muhiim, laakiin xanaanada iyo waalidiinta sidoo kale waxay u adeegsan karaan hayadaha xirfadaha leh si gooni.

Haddii xarunta xanaanada ay ka welwelsan tahay daryeelka ilmaha ee guriga, tusaale ahaan xagga cuntada, caafimaadka ama nadaafadda, waxaa waajib ku ah inay wargeliyaan xeer-ilaalinta carruurta. Markaa waa adeegga daryeelka ilmaha ayaa qiimaynaya inay sii baarayaan arrinta. Isla sidaas ayaa la sameeynhaddii xannaanada carruurtu ay ka welwelsan tahay in carruurtu lagu xadgudbo maskaxeed ama jidheed, ama xadgudub galmo.

Qeybta 104 ee dastuurka (link 8) wuxuu fikir sarasaya "ficilada iyo go'aannada gaaro carruurta, waa inaa la raaco danaha ugu wanaagsan ilamaha". Sharciga waxuu kaalo shegaa "Mas'uuliyiinta gobolka ayaa fududeynaya shuruudaha koritaanka cunugga, oo ay ku jiraan hubinta in ilmuhu helo daruuriga dhaqaale, bulsheed iyo caafimaad ee laagu side ugu hooreyso qoska inaay sido".

## 9. BILAWKA ISKUULKA

Markuu cunuga boos ka helo xanaanada, booskas wuxu leeyahay bilowga iskuulka, ilaa waalidku baajiyo mooyee. Carruurta ugu da'da weyn ee ku jirta xanaanada waxaa loo yaqaan " dugsig bilowga". Xannaanadu waxay hubisaa in carruurtani helaan aqoon iyo caqabado ayado si wanaagsan oo ay ku bilaabaan iskuulka.

Kahor intuusan ilmuhu ka tegin xanaanada, xanaanada waxay buuxisaa foomka kala wareejinta oo loo diraayoo iskuulka bilaabi doono. Foomku wuxuu ka kooban yahay dhibco uu iskuulku doonayo inuu wax ka ogaado oo ku saabsan si uu ugu habeetaan waxbarashada sida ugu wanaagsan ee ugu macquulsan ee ilmaha. Foomka waxaa loo diraa dugsiga iyadoo ay waalidku oggol oo sidaas sharraxeeyso aragtida cunugga wareejiga iskuulka kaa hoor.

## 10. WARBIXIN DHEERAD AH

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan xanaanad kasta waxaa laga heli karta sharciyada iyo jadwalka xanaanada. Sidoo kale waad waydiin kartaa shaqaalaha xanaanada.

Boggahan waxaad ka heli kartaa macluumaad iyo qoraallo ku qoran afaf kala duwan:
Madaado luqaadda hooyada: https://www.morsmal.no/no/

Warbixin luqadaha kale: https://www.morsmal.no/no/tospraklig-materiell
Caruurta luqadaha kale kuu hadla: https://www.morsmal.no/no/foreldresamarbeid/veiledning-til-foreldre/5135-informasjonsheftet-barn-i-flerspraklige-familier
Maktabad luqadaha badan: https://dfb.nb.no/

## 11. KA DAMBEYNTA

1) Sharciga xanaanada (Noorwiiji): https://lovdata.no/dokument/NL/lov/2005-06-17-64

2) Qoraalka qimaha (Noorwiiji): https://www.udir.no/laring-og-trivsel/rammeplan/

3) Degmada Sandefjord: Qoral kuu sabsan is la simnanta iyo is la qimaha xanaanada(Noorwiiji): https://www.sandefjord.kommune.no/globalassets/oppvekst-og-kunnskap/ok-dokumenter/barnehagemyndigheten/standard-for-et-likeverdig-og-tilrettelagt-barnehagetilbud-i-sandefjord-kommune.pdf

4) Degmada Sandefjord: Bilawka iyo la qabshaada xanaanada (dhowr luqaad). https://www.sandefjord.kommune.no/Skole-og-barnehage/Barnehage/information-in-other-languages/

5) Xeer cafimadka shacabka: Goormi ayaa ilmaha laa geyn xanaanada? (Noorwiiji): https://www.fhi.no/sv/barnehage/nar-ma-barnet-vare-hjemme-fra-barne/#naar-skal-barna-vaere-hjemme-fra-barnehagen

6) Ilamaha dhar ficaan u xir goobobka (dhowr luqaad): https://morsmal.no/no/foreldre-norsk/2382-kle-barna-riktig-i-vinterkulda

7) UNs qoralka xaga caruurta (Noorwiiji) https://barneombudet.no/for-voksne/barnekonvensjonen/hele-barnekonvensjonen/

8) Dastuurka: https://lovdata.no/dokument/NL/lov/1814-05-17-nn (§104 ugu wanaga ilmaha)